







Nuux iyo Daadkii Weynaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 6-10

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Nuux iyo Daadkii Weynaa

Waxa qoray Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay Byron Unger; Lazarus

Waxa tarjumay Zemendale Translation Service
Waxa dhaqan-geliyay M. Maillot; Tammy S.

Qisada 3 ee 60

M1914.org

Bible for Children, PO Box 3, Winnipeg MB R3C 2G1 Canada

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu ku magacaabo denbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho.

Ilaah si aada ayuu inoo jecelyahay waxaanu soo diray Wiilkiisa, Ciise, si uu ugu dhinto Iskutallaab korkeeda una bixiyo qaanta denbiyadeenna.

Haddaad rabo inaad kasoo laabato xad-gudubyadaada, sidan ku dhex Ilaah: Ilaahaygii weynaayow, waxaan rumaysanahay inuu Ciise u dhintay aniga aawaday isagoo haddana nool. Fadlan ii kaalay oo iga cafi denbiyadayda, si aan imika u helo nolol cusub, oo aan adiga weligaa kuula jiro. Igu caawi inaan adiga awgaa u noolaado anoo ka dhigan ilmahaaga. Aamiin. Yooxanaa 3:16

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba Ilaah la hadal!

Somali


Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inuu iman doono daad weyn oo qarin doona dhulka oo dhan. Nuux waxa lagu amray, "Dooni ka samayso qoryo loox ah, oo ha noqoto mid ku filan qoyskaaga iyo xayawaan faro badan!" Ilaah waxa uu Nuux u sheegay sidii uu wax u samaysan lahaa, oo Nuuxna arrintaas ayuu ku mashquulay!
3
Markii Nuux uu ka waramay sababta uu doonta u samysanayo waxa dhacday in dadkii ay isaga ku majaajilloodeen. Nuux laakiinse wuxuu iska sii watay samayntii doonta. Sidoo kale wuxuu dadka u sheegayay waxyaalaha Ilaah ku saabsan, balse cidina may dhegeysanin hadalkiisa.
4
Nuux waxa uu lahaa iimaan weyn. Waxa uu rumaystay Ilaah in kasta oo wakhtigaas wax roob ahi aanu hore u di'in. Si dhakhso ahna doonnidii waxa ay diyaar u ahayd in la raro.
5
Waxa haddaba imika yimid xayawaankii. Ilaah waxa uu keenay noocyada xayawaanka oo mid walba lab iyo dhedig ah.
6
Shimbiro waaweyn iyo kuwo yaryar, dugaag yaryar, iyo kuwo dhaadheer dhammaantood waxa ay soo galeen doonnidii.
7
Waxa laga yaabaa in dadku ay ku qaylinayeen oo caayayeen Nuux markii uu xayawaanka ku gurayay doonnida.
8
Waxa dhacday in aanay denbaabitaankii ay Ilaah ku denbaabayeen aanay joojinnin. May odhanin aannu soo galno doonnida.
9
Ugu danbayntii, xayaawaankii iyo shimbirihii waxa ay fuuleen doontii. Ilaahna waxa uu Nuux ku yidhi, "Soo gal doonnida adiga iyo dadka gurigaaguba."
10
Dabeetana, Nuux iyo naagtiisii iyo saddexdiisii wiil iyo naagohoodii waxa ay galeen doonnidii. Oo Ilaahna waxa uu dabeeto xidhay albaabkii doonnida.
11
Waxa kaddibna soo da'ay roobkii. Waxa dhulka oo dhan qariyay roob xooggan muddo gaadhaysa afartan cisho iyo afartan habeen.
12
Biyihii daadka ahaa waxa ay qariyeen magaalooyinkii iyo xaafadihii. Markii roobku dhammaadayna, xitaa buuraha waxa qarinaayay biyo. Wax kasta oo noole ahaana waa uu dhintay.
13
Markii biyuhu ay burqanayeen, doonnidu waxay dul sabbaynaysay biyaha korkooda. Waxa laga yaabaa doonnida gudeheedu inuu ahaa mugdi, waxa laga yaabaa inay ahayd meel laga cabsado. Laakiinse doonnidu waxa ay Nuux ka ilaalisay daadkii.
14
Markii muddo shan bilood ah daadku soconayay, Ilaah waxa uu soo diray dabayl wax qallajisa. Dabeetana doontii waxa ay ku si tartiib ah uugu dul fadhiisatay buuraha Araarad.
15
Nuux waxa uu doonnida gudeheedii kusii jiray muddo gaadhaysa afartan cisho markii ay biyuhu yaraadeen.
16
Nuux waxa uu diray tuke iyo qoolley oo ka baxay daaqadda doonnida. Markii qoollaydii ay weyday meel engegan oo ay ku dul fadhiisato, waxa yay dib uugu soo noqotay Nuux.
17
Muddo toddobaad ah dabadeed, Nuux mar kale ayuu haddana tijaabiyay. Qoollaydii waxa ay markan lasoo noqotay iyadoo afka ku sidda caleen saytuun oo qoyan. Usbuucii xigayna Nuux waxa uu ogaaday inuu dhulku engaganyahay waayo qoollaydii dib uuguma soo noqon isaga.
18